TAAGEERADA SWIIDHISHKA AH EE LOOGU TALA GALAY WAX KU BARASHADA SWIIDHAN

laguugu tala galay adigaaga ah muwaadin ajnabi ah

CSN FAKTABLAD SOMALISKA

Warqaddan xaqiiqda ah waxaad ka akhrisan kartaa macluumaad ku aaddan kuwa ay yihiin muwaadiniinta ajaanibta ah ee xaqa u yeelan kara taageero waxbarasho (caawimaad waxbarasho, gunno xirfad-yaqaan wax ka barasho, taageero billaabid waxbarasho iyo caawimaad dhaqaale) oo loogu tala galay wax ku barashada Swiidhan. Maskaxda ku hay in macluumaadka ku jira warqaddan xaqiiqda ah ay yihiin kuwo guud oo aysan ahayn qoraal sharci ah.

TAAGEERO WAXBARASHO OO SWIIDHISH AH

Marka aad dalbatid taageero waxbarasho oo swiidhish ah waxay CSN-tu baareysaa in aad si waafaqsan xeerarka swiidhishka xaq ugu yeelan kartid taageero waxbarasho oo swiidhish ah ama in si waafaqsan xeerka Midowga Yurub laguula simi karo muwaadiniinta swiidhishka. Haddii CSN-tu ay xaq kuu siiso taageero waxbarasho oo swiidhish ah ama si waafaqsan xeerarka Midowga Yurub ay kuula sinto muwaadiniinta swiidhishka, waxaan sidoo kale eegeynaa haddii aad shuruudo kale buuxineysid si aad u heshid taageero waxbarasho.

YAA SI WAAFAQSAN XEERARKA SWIIDHISHKA XAQ UGU YEELAN KARA?

Xaq ayaad u yeelan kartaa taageero waxbarasho oo swiidhish ah haddii aad Swiidhan deggantihid, aadna buuxineysid qaar ka mid ah shuruudaha cutubyada soo socda:

Waxaad leedahay sharci degganaasho oo joogto ah

Haddii aad Laanta socdaalka ka heshay PUT (sharci degganaasho oo joogto ah) waxaad xaq u yeelan kartaa taageero waxbarasho oo swiidhish ah.

Waxaad leedahay carruur leh dhalasho swiidhish ah, waxaadna leedahay sharci degganaasho oo joogto ah oo shaqeynaya

Haddii aad leedahay carruur swiidhish ah, aadna si wada jir ah Swiidhan isula deggantihiin, waxaad xaq u yeelan kartaa taageero waxbarasho oo swiidhish ah. Waa in xitaa aad leedahay sharci degganaasho oo shaqeynaya oo ku saleysan xiriir qoys oo aad la leedahay muwaadinka swiidhishka ah.

Waxaad Swiidhan ku leedahay meeqaam qaxootinimo ama wax sidaas oo kale ah

Haddii Laanta socdaalku (Migrationsverket) ay u aragto in aad tihid qaxooti, qof badbaado u baahan ama aad sharci degganaasho heshay iyadoo ay sababtu tahay xaalado aad iyo aad loogu garaabi karo, waxaad xaq u yeelan kartaa taageero waxbarasho oo swiidhish. Adigaaga megengelyo doonka ah xaq uma lihid taageero waxbarasho.

Waxaad leedahay xaq joogitaan, xiriir joogto ahna waxaad la leedahay Swiidhan

Haddii aad leedahay xaq joogitaan, xiriir joogto ahna aad Swiidhan ku leedahay, xaq waad u yeelan kartaa taageero waxbarasho. Sida caadigaa waxaad xaq joogitaan leedahay haddii aad tihid

WAA MAXAY TAAGEERO WAXBARASHO OO SWIIDHISH AH?

Taageero waxbarasho waxay noqon kartaa kaalmo waxbarasho, gunno farsamo-yaqaan farsamo ka barasho, kaalmo dhaqaale oo waxbarasho ama taageero waxbarasho billaabid. Halkaan waxaan si kooban ugu qeexeynaa taageerooyinka kala duduwan. Waxaad wax dheeraad ah ka akhrisankartaa www.csn.se.

CAAWIMAAD WAXBARASHO

Caawimaadda waxbarashadu waa kaalmo dhaqaale oo loogu tala galay ardayda dhigata dugsiga sare, waxbarashada dadka waaweyn (komvux) ama dugsiyada dadka waaweyn ee shacbiga ah (folkhögskola). Waxaad heli kartaa caawimaad waxbarasho ilaa iyo xilli dugsiyeedka guga ee sannadka aad buuxineysid 20 sanno.

KAALMADA DHAQAALE EE FARSAMO-YAQAAN FARSAMO KA BARASHADA

Kaalmo dhaqaale oo farsamo-yaqaan farsamo ka barasho waa kaalmo loogu tala galay ardayda dhigata waxbarashada dugsiga sare ee farsamo-yaqaan farsamo ka barashada. Waxaad heli kartaa caawimaad dhaqaale oo farsamo-yaqaan farsamo ka barasho ilaa iyo xilli dugsiyeedka guga ee sannadka aad buuxineysid 20 sanno.

KAALMO DHAQAALE OO WAX LAGU BARTO

Kaalmo dhaqaale oo wax lagu barto waa kaalmo lacageed iyo deyn aad codsan kartid marka aad wax ka baraneysid dugsiga dadka waaweyn ee shacbiga ah (folkhögskola), waxbarashada dadka waaweyn (komvux), jaamacadda farsamada, jaamacadaha. Adiga ayaa dooranaya haddii aad rabtid qeybta kaalmada oo kaliya ama haddii aad sidoo kale rabtid inaad lacag deynsatid.

TAAGEERADA WAXBARASHO BILLAABIDDA

Taageerada waxbarasho billaabiddu waa kaalmo lacageed oo dadka aan shaqeynin qaarkood ay waqti gaaban qaadan karaan si ay u dhigtaan waxbarasho dugsi sare, korna ugu qaadaan fursadahooda shaqada. Waa degmada uu qofku degganyahay cidda ugu horreyn qiimeyneysa kuwa ka tirsan kooxda loola jeeda taageerada waxbarasho billaabidda. Waa meeshaas sidoo kale halka aad codsigaaga ka sameyneysid.

CSN nr 4146O/1802

- muwaadin u dhashay waddamada Midowga Yurub/Iskaashiga Dhaqaalaha reer Yurub (EU/EES) ama Switzerland
- qof ay is qabaan ama ay wada noolyihiin muwaadin u dhashay waddamada Midowga Yurub/Iskaashiga Dhaqaalaha reer Yurub (EU/EES) ama Switzerland (maaha swiidhish) oo Swiidhan ku leh xaq joogitaan.

Xiriir joogto ah oo Swiidhan ah waxaad heli kartaa haddii aad

- Swiidhan ka shaqeysay ugu yaraan laba sano
- qof isku qabteen ama iskula nooleedeen Swiidhan ugu yaraan labadii sano ee la soo dhaafay.

Haddii aad halkan ka shaqeysay waa in aad ugu yaraan waqtiga barkiis shaqeysay muddo laba sano ah. Waa in sidoo kale aad waqtigaas Swiidhan degganeyd. Waqtiga shaqadaada waxaa laga soo tirinayaa maalinti aad Swiidhan timiday si aad halkan u degtid. Shaqo ahaan waxaa loo tiriyaa

- shaqo Swiidhan gudeheeda ah
- shaqo aad ka shaqeyneysid shirkad aad leedahay oo Swiidhan ka diiwaan gashan
- daryeelid aad daryeeleysid canug kaagaa oo toban sano ka yar
- shaqo la'aan ugu qornaasho xafiis shaqo oo swiidhish ah
- ka qeyb qaadasho waxbarasho suuqa shaqada ah
- barashada afka swiidhishka ee loogu tala galay ajaanibta (sfi) ama barasho xagga swiidhishka oo ugu badnaan heer dugsi hoose-dhexe ah
- waqti aad qaadaneysay gunno bukaan, gunno dhaq-dhaqaaq ama wax sidaas oo kale ah.

Haddii aad is qabtaan qof muwaadin swiidhish ah waa in aad Swiidhan isla degganeedeen ugu yaraan laba sano. Waqti ka gaaban waa la aqbali karaa haddii aad afar sano isla wada degganeedeen taasoo ay ku jirto hal sano oo Swiidhan ah ama haddii aad carruur isu leedihiin. Swiidhan ku xirnaasho joogto ah waxaad sidoo kale heli kartaa haddii aad ugu yaraan laba sano Swiidhan la degganeyd qof muwaadin ajnabiya ah. Markaas waa in ninkaaga, xaaskaaga ama qofka aad wada nooshihiin uu sidoo kale si waafaqsan xeerarka swiidhish xaq ugu leeyahay taageero waxbarasho oo swiidhish ah. Waqti intaas ka gaaban waa la aqbali karaa haddii aad carruur isu leedihiin.

Waxaad ka yareyd 20 sano markii aad timid Swiidhan

Haddii aad 20 sano ka yareyd markii aad Swiidhan timid si aad halkan u degtid, xaq waad u yeelan kartaa taageero waxbarasho haddii

- aad Swiidhan xaq joogitaan ugu leedahay, waalidkaaguna uu Swiidhan ka shaqeeyo. Wax dheeraad ah oo ku aaddan xaqa joogitaanka iyo waxa shaqo lala meel dhigo ka akhriso cutubka hore.
- adiga iyo waalidkaa aad heysataan sharci degganaasho oo shaqeynaya oo ku saleysan qoys ahaan ku xirnaasho qof deggan Swiidhan
- laguugu meeleeyay qoys guri xannaano ama goob kale oo hoos timaada hey'ad swiidhish ah
- waxaad tahay waalid si gaar ah loogu doorta si waafaqsan xeerka waaliddiinta.

YAA LALA SIMI KARAA MUWAADIN SWIIDHISH AH SIDA KU CAD XEERKA MIDOWGA YURUB?

Waxaa lagula simi karaa muwaadin swiidhish ah haddii aad buuxineysid mid ka mid shuruudaha cutubka soo socda:

Waxaad ka shaqeysaa ama ka shaqeysay Swiidhan

Adigaaga ah muwaadin u dhashay waddamada Midowga Yurub/Iskaashiga Dhaqaalaha reer Yurub (EU/EES) ama Switzerland waa lagula simi karaa muwaadin swiidhish ah haddii aad Swiidhan ku tihid shaqaale ama shirkadle soo galooti ah.

Si laguugu qiimeeyo shaqaale ama shirkadle soo galooti ah, waa in aad shaqeysay waqti ku filan ama saacado ku filan usbuuciiba. Waxaa intaas dheer in ay khasab tahay in aad sii shaqeysid isla mar ahaanta aad wax baraneysid. Si shaqada loo xisaabiyo waxaa loo baahanyahay in aad ka shaqeysid ama ka shaqeysay Swiidhan. Waa in aad qaadataa ama qaadatay mushaar ama gunno kale oo laguugu siiyay shaqadaada.

Adigaaga shirkadlaha ah waxaa lagaaga baahanyahay in shirkaddaadu ay leedahay warqadda canshuurta shirkadda (F-skattsedel), ayna ka diiwaan gashantahay Hey'adda canshuuraha (Skatteverket). Waxaa intaas dheer in ay khasab tahay in aad shirkaddaada si firfircoon uga shaqeysid.

Adigaaga joojiyay in aad shaqeysid waxaad mararka qaarkood sii lahaan kartaa meeqaamkaaga shaqaalanimo ama shirkadle soo galooti ah ee Swiidhan. Meeqaamka caadi ahaan waad sii lahaan kartaa intii waqti ah haddii aad buuxisid mid ka mid ah waxyaabaha soo socda:

- Waxaad dhigataa ama dhigan doontaa waxbarasho xirfad ku jeedda, xiriir ayaana ka dhexeeya shaqadaada iyo waxa ay waxbarashadu ka koobantahay.
- Ma shaqeyn kartid si ku meel gaar ahaan ah iyadoo ay sababuhu yihiin cudur ama shil.
- Si aan rabitaankaaga ahayn ayaad shaqadaadi Swiidhan ku weysay, waxaadna shaqa doon ahaan isaga qortay xafiis shaqo oo swiidhish ah.

Waxaad qaraabo la tahay muwaadin u dhashay waddamada Midowga Yurub/Iskaashiga Dhaqaalaha reer Yurub (EU/EES) ama Switzerland Waxaad ka shaqeysaa Swiidhan

Adiga qaraabada la ah muwaadin u dhashay waddamada Midowga Yurub/Iskaashiga Dhaqaalaha reer Yurub (EU/EES) ama Switzerland oo Swiidhan ku ah shaqaale ama shirkadle soo galooti ah, waa lagula simi karaa muwaadin swiidhish ah.

Waxaa qaraabo ahaan laguu arki karaa haddii aad:

- tahay nin, xaas, qof ay qof isla noolyihiin
- tahay canug ka yar 21 sanno

iyo in mararka qaarkood aad tihid

- qof masruuf ahaan waalidkiisa ku xiran
- qof masruuf ahaan carruurtiisa ku xiran.

Adigaaga aad is qabtaan, aadna isla deggantihiin ama wada nooshihiin muwaadin swiidhish ah laguuma arko

caadi ahaan in aad qaraabo la tihid muwaadin Yurubiyaan ah. Taas sababteedu waxaa weeye in muwaadinka swiidhishka ah uusan caadi ahaan soo galooti ka ahayn waddankiisa. Saas oo ay tahay muwaadin swiidhish ah waa loo arki karaa mararka qaarkood sida in uu soo galooti u yahay si waafaqsan xeerka Midowga Yurub haddii qoftu ay si wada jir ah qoyskeeda ula adeegsaneyso xaqeeda xurriyadda dhaqdhaqaaqa, ayna degeyso waddan kale oo ka tirsan waddamada Midowga Yurub/Isskaashiga Dhaqaalaha reer Yurub (EU/EES) ama Switzerland, dabadeedna ay Swiidhan u soo laabato oo ah halkan ka shaqeyso.

Waxaad Swiidhan ku leedahay sharci joogitaan oo joogto ah

Adigaaga u dhashay mid ka mid ah waddamada Midowga Yurub/Iskaashiga Dhaqaalaha reer Yurub (EU/EES) waxaa lagula simi karaa muwaadin swiidhish ah, haddii aad Swiidhan ku leedihid PUR (xaq joogitaan oo joogto ah). Haddii aad ugu yaraan shan sano si sharci ah Swiidhan ku joogtay hakasho la'aan waxaad caadi ahaan leedahay PUR. Adigaaga aan u dhalan mid ka mid ah waddamada Midowga Yurub/Iskaashiga Dhaqaalaha reer Yurub (EU/EES) laakin qaraabo la ah qof nuucaas ah (maaha swiidhish), waa lagula simi karaa sidoo kale muwaadin swiidhish ah, haddii aad Laanta socdaalka ka heshay kaar joogitaan oo joogto ah. Waxaad xitaa heli kartaa PUR haddii aad qaraabo la tihid muwaadin u dhashay Midowga Yurub/Iskaashiga Dhaqaalaha reer Yurub (EU/EES) (maaha swiidhish), aadna si wada jir ah oo aan kala go' lahayn Swiidhan isula degteen ugu yaraan shan sano.

Mararka qaarkood waqtigi loogu tala galay ka hor ayaad heli kartaa xaq joogitaan oo joogto ah. Si aad macluumaad dheeraad ah u heshid la xiriir CSN.

Waxaad leedahay meeqaamka ah qof si joogto ah u deggan

Waa lagula simi karaa muwaadin swiidhish ah haddii aad

- tihid muwaadin u dhashay waddan ka baxsan Midowga Yurub

aadna

- sharci degganaasho ka heshay Laanta Socdaalka maadaama aad meeqaam si joogto ah u
- degganaasho aad ku leedahay Swiidhan ama waddan kale oo Midowga Yurub ka tirsan.

Xeerar gaar ah

Waxaa jira xeerar gaar ah oo loogu tala galay adigaaga ah carruur uu dhalay cilmi baari marti ku ah Swiidhan, carruur uu dhalay muwaadin Turkish ah oo Swiidhan ka shaqeeya ama qaraabo la ah qof heysta kaarka buluugga ah ee Midowga Yurub (EU-blåkort) oo Swiidhan jooga. Si aad macluumaad dheeraad ah u heshid la xiriir CSN.

MACLUUMAAD DHEERAAD AH

Macluumaad dheeraad ah oo ku aaddan caawimaadda waxbarashada, gunnada farsamo-yaqaan farsamo ka barashada, kaalmada dhaqaale ee waxbarashada iyo taageerada waxbarasho billaabidda waxaad ka heleysaa www.csn.se. Halkaas waxaad sidoo kale ka akhrisan kartaa sida aad taageero waxbarasho u dalbaneysid. Haddii aad dooneysid in aad cid kala hadashid CSN-ta, waxaad, maalmaha caadiga 8.00-16.30, naga soo wici kartaa 0771-276 000.

Waddamada Midowga Yurub waa
Biljam Bulgaariya, Qubrus, Denmark, Estland, Finland, Faransiiska, Giriigga, Irland, Talyaaniga, Koroaatiya, Lettland, Lituwaaniya, Luksemburg, Maalta, Holand, Booland, Bortaqiis, Rumaaniya, Slovaakiya, Sloveeniya, Isbeyn, Ingiriiska, Jeek, Jarmalka, Hangari iyo Oosteriya.

Waddamada Iskaashiga Dhaqaalaha Yurub waa
Waddamada Midowga Yurub iyo Island, Liechtenstein och Norway.